Ayaan Darane

Qeybta 1aad

" Abuu Muslim Al-khuraasaani

iyo

Cabbaasiyiintii ".

HORDHAC:

Waxaan qormadan oo ay xigi doonaan kuwo kale - in shaa Allaah- kaga sheekayn doonaa nin ayaan darane ahaa, taarikhduna ku xustay danbiyadii uu galay iyo sidii xumayd ee uu uga galbaday dunida, waxayna tusaale iyo waano u tahay dad badan oo qaadaya dariiqaas oo kale hadiiba ay waano dhago weeleeya leeyihiin.

In kasta oo qormadani tahay taariikh hore, dadkeediina tageen hadana waayaha waa lagu cibra qaataa, waayo ayaamaha nolosha ayaa isu muuqaal ekaada ayagoo wata magacyo kala duwan, sidaas darteed ayaa Quraanka Kariimka ahi in badan soo gudbiyaa waxii hore ee ka dhacay dunida si loogu waayo qaato.

Intaas kadib hadaan qeexno qofka aan ula jeedno Ayaan Darane, waxaan dhihi karnaa sidan:

Ayaan Darane: Waa qof inta lagu shaqaystay, markii lagu dan gaadhay, dibada loo tuuray amaba la dilay**.**

Ayaan Darane: Waa qof inta dakane la galiyay hadana dibadda la dhigay asaga oo dayacan.

Ayaan Darane: Waa qof inta dadkii lagu diray hadana daaqadaha laga xidhay.

Ayaan Darane: Waa qof inta diin xumo iyo danbi la galiyay, hadana dunida in uu calfadana loo diiday.

Khuraasaan: Waxaa lagu magacaabi jiray wadamada hadda la yidhaahdo **(Pakistaan)** iyo(**Afgaanistaan).**

Abuu Muslim: Waa **C/raxmaan Bin Cismaan Bin yassaar** Wuxuuse ku can baxay magaca (**Abuu-Muslim Al-Khuraasaani**).

Cabbaasiyiin: Waa qoys ku abtirsada **Cabbas bin Cabdi Mudalib** oo ahaa Nabiga scw adeerkii, oo inta uu Muslimay hadana u gargaaray Nabiga scw, kana mid noqday saxaabadiisii.

Waxay **Cabbaasiyiintu** ahaayeen: boqortooyo qabsatay xukunkii Muslimka sanadkii **132H**, ayagoo kala wareegay boqortooyadii reer **Banii Umaya**, Waxayna haysteen waqti dheer oo ka badan **600** oo sano oo ay kursiga kala dhaxlayeen.

Taariikh Kooban:

1. Wuxuu **Abuu- Muslim** billbay abaabul lagu minja xaabinayay boqortooyada reer **Banii Umaya**, laguna dhisayay dawlad ay madax ka yihiin reer **Banii Cabbaas**.
2. Wuxuu abaabulku ahaa qarsoodi sanadkii **129H**, markii ay xoogaysteen waxay qabsadeen **Khuraasaan,** sanadkii **131H**, waxayna rideen dhamaan dawladii hore sanadkii **132H**, oo khilaafada loo dhaariyay **Abuu Al-Cabbaas Al-Safaax**, oo ahaa dhiigyacab dad badan gumaaday, hase ahaatee ma haysan waqti dheer oo geeri ayaa ku timid.
3. Waxaa jabhadda cusub ee uu hogaaminayo **Abuu-Muslim Al-khuraasaani** astaan u ahayd calan iyo cimaamad madow, mar la waydiiyay asaga oo khudbaynaya waxa ay ka dhigan tahay cimaamadda madow wuxuu sheegay in ay kaga dayanayaan **Nabiga scw** oo galay **Makka** asagoo xidhan cimaamad madow, kadibna wuxuu amar ku bixiyay in la dilo qofkii su'aasha waydiiyay, asaga oo u cuskaday in taasi meel kadhac ku tahay haybadda iyo dharka dawladda.
4. Markii uu dhintay **Abu- Al-Cabbaas Al-Safaax** sanadkii **136H**, wuxuu xilkii u dardaarmay walaalkii **Abuu- Jacfar Al-Mansuur** oo aanay isku fiicnayn **Abuu-Muslim Al-Khuraasaani**.

5. Waxaa ku qabsaday **Abuu-Jacfar Al-Mansuur** xilkii adeerkiis **C/laahi Bin Cali Bin C/laahi Bin Cabbaas** oo kamid ahaa dadkii sida aadka ah u laayay reer **Banii Umaya**, wuxuuna sheegtay in asaga loo dardaarmay xilka boqortooyada.
6. Wuxuu **Abuu- Jacfar Al-Mansuur** adeegsaday ninkii khatarta ahaa ee **Abuu-Muslim Al-Khuraasaani** si uu kacdoonka adeerkii wax uga qabto, waana fuliyay amarkii oo wuu soo afjaray kacdoonkii uu ninkaasi hogaaminayey, asagiina waa soo dilay, wuxuuna ahaa dagaal uu dhiig badani ku daatay.
7. **Abuu- Muslim Al-Khuraasaani** wuxuu dagaal dheer iyo dadaal badan u soo maray riditaanka **Umawiyiinta** iyo xukun saaridda **Cabbaasiyiinta** asaga oo Allah ugu dhawaanaya**,** waxaana lagu qiyaasaa dadkii uu u laayay dhisitaanka dawalada **Cabbaasiyiinta** 600,000/ oo qof ugu yaraan.
8. Waxaa jirtay cuqdad uu qabay **Abuu-Jacfar Al-Mansuur** asaga oo **Abuu- Muslim** ka tirsanayey qadarin la'aan iyo qab waynan ah in uu sameeyo waxa uu rabo, oo keentay in ay la qumanaato in la dilo **Ab-Muslim Al-Khuraasaani**, markii uu sidaas kula taliyay walaalkii **Abul-Cabbaas Al-Safaax** ayuu u sheegay in uu aamuso arrintaasna qarsado, wuuna aqbalay.
9. Markii ay dawladii cagaha dhigatay, mucaaradkii-na la sifeeyay oo uu ugu danbeeyay boqorka adeerkii, Waxaa markiiba **Abuu-Jacfar Al- Mansuur** uu ka fikiray siduu isu dhaafin lahaa **Abuu- Muslim Al-khuraasaani** oo aad ugu soo dagaalamay, ciidamo & taageero bandanna haystay gaar ahaan dhulka **Khuraasaan**.
10. Si **Abuu-Muslim** awoodiisa loo wiiqo, godkiisii **Khuraasaan**-na looga saaro ayaa waxaa loo magacaabay ninkii **Abuu- Muslim** ka hooseeyay ee uu xilka kaga soo tagay (**Abuu-Daawuud**), waxaana loo ballan qaaday in uu waligiis haynayo haddii uu **Abuu-Muslim** ka hoos baxo oo boqortooyada (Khliaafda) ku xidhmo, asagiina waa aqbalay, wuxuuna **Abuu-Muslim** ku soo wargaliyay in uu xilkii **Khuraasaan** kala wareegay oo aanu isku soo hallaynin.
11. Waxaa kale oo la soo saaray wareegto **Abuu**-**Muslim** loogu magacaabayo in uu madax ka noqdo gobolada **Masar** Iyo **Shaam** kuwaas oo xarunta boqortooyada uga dhowaa **Khuraasaan**, asaguna uusan ku lahayn taageerayaal badan, taas oo uu diiday **Abuu-Muslim**, uuna fahmayey in ay tahay shirqool hordhac ah oo lagaga fogaynayo gobolkii uu taageerada ku lahaa.
12. Waxaa dabin shirqool ah loo dhigay **Abuu-Muslim**, waxaana loogu yeedhay daartii boqortooyada ee **Ciraaq**, asaga oo ka soo laabtay dagaalkii uu ku soo dilay boqorka adeerkii, asaguna wuu qabay dareenka **Abuu-Jacfar Al-Mansuur** ee ah in uu dili doono, wuxuu isku dayay in uu diido imaatinka daarta khilaafada, hase yeeshee sasabaad iyo hanjabaad dheer kadib wuxuu ku dhacay dabinkii lagu dili doono.
13. Waxaa loo sii uruuriyay danbiyo dhawr ah oo looga dhigtay marmarsiiyo, markii uu ku calaacalay dagaalkii uu u soo galay dhalashada dawaladnimada reer **Banii Cabbaas**, waxba uma tarin maadaama uu khatar ku yahay in la calfado dawladnimadan.
14. Markii uu arkay in la dilayo, dadkiisiina laga reebay waxuu dalbaday in uu u noolaado cadawga dawladda oo la daayo, waxaase u jawaabay **Abuu-Jacfar Al-Mansuur** oo yidhi:" *Wa kuma cadowga adiga iga kaa cadowsan* " kadibna waa dilay.
15. Waxaa **Abuu**-**Jacfar** markii uu dilay **Abuu**- **Muslim** laga sheegaa in uu yiri:" *Hadda ayay boqortinimadu xalaalowday, reer **Banii Cabbaas**-na dadka kale ka yeesheen"*.

Maxaa Loo Dilay Abuu-Muslim Al-Khuraasaani

1. **Dhaqanka siyaasadeed** ee dunida ka jiray waqti dheer wuxuu ku dhisan yahay danaysi, markii qofka laga dhamaysto danta laga leeyahay waxaa laga shaqeeyaa sidii dunida loo dhaafin lahaa ayada oo sababo loo cuskanayo sida:.
    1) **Waxaa** mararka qaar sababtu noqotaa in laga baqayo awoodiisa oo ay tahay in la is dhaafiyo, si loo calfado midhihii lagu soo tabcay.
    2) **Marar** kale-na waxaa lagu saleeyaa in aanay faafin sirta uu hayo oo khatar ku noqon karta dadkii ku shaqaysanayey, halka ugu aaminsan ee sirtaas lagu qariyo-na uu qabri yahay.
2. **Dhaqanka Shirkadaha:** Waxaa taas lamid ah shirkadaha qaata qandaraasyada oo shaqaaleeya dad badan oo kala muhiimsan, waxay sameeyaan shaqaale dhimis marka ay shaqadu yaraato ama mashruucu soo dhamaanayo.
    1) **Waxay** shirkaduhu soo reebtaan hadba inta lama huraanka ah, haddii ay qasab noqoto in la diro qof muhiim ahaa oo shaqo wanaagsan soo qabtay waxaa la siiyaa shahaado sharaf, waxaana loo qabtaa xaflad xasuus iyo sagootis ah.
    2) **Hadii** ay ahayd shaqada uu qofkaasi qabtay mid muhiim ahayd laakiin aan la sheegan Karin, lagana cabsi qabo in wax ka soo laabtaan shaqadii uu qabtay iyo xogtii uu hayay, waxaa shahaado sharaf looga dhigaa in la shahiidsiiyo.

Sidaas Darteed:

- Wuxuu **Abuu-Muslim** Qabtay shaqo aad u wayn, wuxuuna ahaa nin haysta taageero badan oo ciidan, gaar ahaan gobolada **Khuraasaan**.
- Wuxuu **Abuu-Muslim** ahaa nin dhadhamiyay xukunka, khibrad badan oo dagaalna yeeshay, oo inta dawlad dumiyay mid kale dhisay, in uu ku hindiso mar kale samaynta dawlad cusubna ay dhici karto.
- Wuxuu ahaa **Abu-Muslim** nin geesinima iyo Caqli badan oo doonayey in la qiimeeyo, isuna haystay in uu abaal ku leeyahay boqorada reer **Banii Cabbaas,** taasina ma jecla madaxdu oo ayagaa isla doonaya in loo tiiriyo abaal kasta.
- Waxay boqorada reer **Banii Cabbaas** dhinacooda ka dareemayeen khatar ah in uu noqdo mucaarad, oo caqabad ku noqdo in ay calfadaan dawladnimadii u dhalatay, dhiiga bandanna loo soo daadiyay.
- Siyaasadda aan Allaah ka cabsi ku dhisnayn malaha saaxiib joogta ah, ee waxay leedahay maslaxad joogta ah, hadba meesha ay ku bulaalayso ayaa lala beegsadaa, labadii shalay isku danta ahayd ayaa maanta kala dabayshada.
- Boqorada reer **Banii Cabbaas** iyo **Abuu-Muslim** isuguma imaan in dhiiga Muslimka la badbaadiyo, ee waxay shirkad ku ahaayeen in cidii khatar mucaaradnimo lagu ogaado lagu duulo ama la dilo, hadana ayagii ayaa isku soo hadhay sida Atooreyaashii.
- Ninba waa maalintiisee waxaa **Abuu-Muslim** laga waraabiyay koobkii uu dad badan ka waraabiyay, waxaa lagu riday god uu dad badan ku riday, waxaa lagu dilay dabin uu dad badan ku dilay, nabsigii uu galabsaday waa laga gooyay, godkii aakhirana waa gar xisaabeed oo aan laga gaban Karin.

Waxaa Qoray/

Sh. Maxamuud Shibli

06/04/2014

Mombassa - Kenya